

Xarunta Kontoroolka Cudurka
Baaritaanka Maqaarka Mantoux

(Soomaali)

Maarso 2012

Baaritaanka Maqaarka Mantoux

(baaritaanka maqaarka ee qaaxada)

Waa maxay sababta aan u sameynayo baaritaanka maqaarka?

Marmarka qaarkood dadku waxay qaadi karaan jeermiska qaaxada (TB) iyagoon u qaban cuddurka dhab ahaan. Baaritaanka Mantoux (baaritaanka maqaarka ee qaaxada) wuxuu tusi karaa haddii qofku weligiis uu ku dhacay jeermiska TB. Infekshinka TB micnihiisu ma aha inuu qofku qabo cudurka, laakiinse haddii uu qofi qaado waxaa laga yaabaa inuu qofku u jirado TB mustaqbalka.

Yaa u baahan baaritaanka maqaarka?

- U dhawaanshaha qof qaba cudurka TB oo firfircoon. Tani waxay noqon kartaa xubin qoyska ka mid ah, saaxiibo, ama dadkaad la shaqeyso.
- Kuwa mara raajada xabbadka oo sheegaysa inay qabaan cudurka TB oo aan la daaweyn hadda ka hor.
- Dadka qaba ee isdifaaca jirkoodu hoos u dhacay sida infekshinka HIV ama xaalad caafimaad oo kale.
- Dadka looga baahan yahay inay baaritaan lagu sameeyo sabab shaqo awgeed ama barnaamijka iskiriingareynta dugsiga (haddii aysan qabin baaritaanka maqaarka oo hore looga helay).
- Ka hor intaan la siin BCG ilmaha dhashay ee ka weyn da'da ah 6 bilood.
- Dadka laga yaabo inay ku deeqaan xubin jirkooda kamid ah.
- Dadka u safraya dalalka khatartoodu sareyso.

Baaritaanka maqaarka (The Mantoux test)

Baaritaanka maqaarku waa baaritaan ammaan ah oo sahlan. Waxaa lagu durayaa qadar yar oo ah borotiinka la saafi yeelay ee qaaxada (Tubersol[®]) xagga hoose ee qofka maqaarka gacantiisa iyadoo la isticmaalayo siliinge iyo cirbad nadiif ah. Fal celinta maqaarka (barar) waxaa lagu cabiraa 2 ilaa 3 maalmood mar danbana natiijada waa la diiwaangeliyaa.



Waxyeelada suurta galka ah

Waxyeelada waa mid guud. Si kastaba ha ahaatee, qofka la kulmay jeermiska TB-da waxaa laga yaabaa inuu wakhti wakhti uu sameeyo falcelin xad leh, oo laga yaabo inay dhaliso degenaan la'aan. Bararkan waa inuu ku baaba'aa qiyaastii 2 toddobaad gudahood.

Falcelintu waxay noqon kartaa mid cuncun leh. Waxaa wanaagsan inaadano xoqin gacanta – wax qabow oo lagu caddaadiyo ayaa kaa debsin kara cuncunka.

Waa maxay micnaha natiijada waxba lagama helin?

Haddii bararka uu ka hooseeyo ilaa xad natiijada baaritaanka waa waxba lagama helin. Badanaa tan micnaheedu waxaa weeye in qofka uusan qaadan jeermiska TB. Si kastaba ha ahaatee, xaaladaha qaarkood waxay noqon kartaa mid aan waxba laga helin xitaa marka qof uu qaaday. Tani waxay ku dhici kartaa haddii la xiriirida TB da ay ahayd dhawrkii toddobaad ee ugu danbeeyey jirkuna uusan helin wakhti uu ku sameysto falcelin ama haddii difaaca jirka la daciifiyey oo uusan awoodin inuu falcelin ka sameeyo baaritaanka maqaarka. Xaaladahan oo kale baaritaanku waxaa laga yaabaa in loo baahdo in lagu celiyo ama loo turjumo si ka duwan sida caadiga ah.

Waa maxay micnaha waa laga helay?


Taas micnaheedu waxaa weeye in qofka laga helay jeermiska TB, laakiinse taas micnaheedu ma aha inuu qabo cudurka TB da. Qofkani uma gudbin karo qof kale TB ilaa ay wakhti danbe isubedesho cudurka TB oo firfircoon mooyee.

Sidee baa qof looga heli karaa oo uusan u qabi karin cudurka TB?

Ka dib marka jeermiska TB uu galo jirka, xaaladaha badidooda, difaacyada jirka ayaa kontoroola jeermiska iyagoo ku dhisaya derbi hareerhooda, waa sida qolofu ugu sameysanto marka meel wax kaa gooyaan. Jeermisku wuxuu ku noolaan karaa derbiyadan dhexdooda sannado isagoo ah xaalad 'aan firfircooneyn' ama qarsoon. Marka jeermiska TB uu yahay mid aan firfircooneyn, qofka ma waxyeelayn karaan, **dadka kalena kuma faafi karaan**. Qofku waa qabaa laakiinse ma jirana umana eka inuu ka warqabo in isaga ama iyadu ay qabaan.

Waa maxay cudurka TB?

Qaaxadu waa cudur infekshin leh oo badanaa waxyeela sambabada laakiinse wax buu yeeli karaa qaybaha kale ee jirka. Wuxuu qofka kaga faafaa qofka kale isaga oo hawada u raacaya isagoo ah dhibco yar yar oo infekshin ah. Waa suurto gal in cudurka TB in waxyar ka dib marka jeermisku galo jirka, haddii difaaca jirku uu daciifsan yahay. Waxaa sidoo kale u suurto gal ah jeermiska TB-da aan firfircooneyn inay noqdaan kuwo firfircoon marka difaacyada jirka ay daciifaan. Tani waxay noqon kartaa sannado ka dib gabowga awgii, jiro khatar ah, sonkor ku dhacda, isticmaalka daroogo ama aalkolo, ama infekshinka HIV.



Maxaa dhacaya ka dib marka la akhriyo baaritaanka maqaarka Mantoux?

Haddii baaritaanka aan waxba laga helin, wakhtigan baaritaano dheeraad ah looma baahna, laakiinse waxaa laga yaabaa inaad u baahato baaritaan kale billo yar ka dib, iyadoo ku xiran sababta baaritaanka loo sameynayo.

Haddii baaritaanka wax laga helo, waxaa loo baahan doonaa baaritaan jireed iyo raajada xabadka si loo hubiyo inaysan jirin wax calaamad ah cudur firfircoon. Haddii aysan jirin calaamado firfircoon oo TB dhakhtarku wuxuu kaala hadli doonaa suurtagalnimada inaad qaadato daawo waxay ku xiran tahay da'da qofka, caafimaadka iyo khatarta hoos timaada ee cudurka TB.

Wixii macluumaad dheeraad ah la xiriir Rugta Caafimaadka TB ee degmadaada:

Alice Springs	8951 7548
Darwin	8922 8804
Katherine	8973 9049
Nhulunbuy	8987 0282
Tennant Creek	8962 4259

ama www.nt.gov.au/health/cdc

Xarunta Kontoroolka Cudurka

Wasaaradda Caafimaadka ee Northern Territory

Maarso 2012

Wixii macluumaad dheeraad ah

Wixii macluumaad dheeraad ah la xiriir Rugta Caafimaadka Degmada.

Alice Springs	89517548
Darwin	89228804
Katherine	89739049
Nhulunbuy	89870357
Tennant Ck	89624259

ama www.nt.gov.au/health/cdc

Xarunta Kontoroolka Cudurka

Wasaaradda Caafimaadka ee Northern Territory

Maajo 2011

I Mr. Ibrahim Abdi of Naati 35032 certify that I translated this document from English into Somali language in the best of skills and knowledge.